

Daryeelka ilmaha intuu jiro Cudurka Coronavirus

Waalidiin badan ayaa isku dayaaya inay helaan dookhyada daryeelka carruurta oo ay u helaan ilmahooda lagasoo billaabo markii Gudoomiyaha gobalku amray xirista dhammaan dugsiyada Washington sabab la xariirta talaabooyinka kala fogaynta dadka si looga hortago in cudurka Coronavirus ku uu faafo.

Waalidiintu waa inay iskudayaan inay ilmahooda ku hayaan guriga. Hase yeeshee, arintaani maaha mid markasta suurtagal ah. Qorshayaasha daryeelka ee gaarka ah ayaa si gaar ah muhiim ugu ah shaqalaha caafimaadka, shaqaalaha gurmada degdega ah iyo shaqaalaha kale ee qabanaaya shaqooyinka muhiimka ah inta lagu jiro xaaladaan degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha.

Xarumaha daryeelka ee sii furnaanaaya, aad ayay muhiim u tahay inay yareeyaan khatarta faafida cudurka Coronavirus. Tilmaamaha soo socda ayaa loo dajiyay si loo caawiyo adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta, waxbarashada dhallaanka iyo dugsiyada bixinaaya daryeelka si loo dhawro heerarka caafimaadka iyo badbaadada iyo amarada kala fogaanshaha dadka inta la bixinaayo adeegga aadka loogu baahan yahay.

Tilmaanta guud

Ka dheeree carruurta, shaqalaha, waalidiinta iyo masuuliyiinta xarumaha haddii ay muujiyaan astaamaha cudurka COVID-19, ay la jooheen qof qaba cudurka COVID-19 14 kii maalmood ee ugu danbeeyay, ama ay khatar wayn ku jiraan sabab la xariirta xaalado caafimaad oo ay horay u qabeen.

Dadka khatarta Wayn ugu Jira Xanuunada Daran ee ka dhasha COVID-19

Dadka duqoowda ah, haweenka uurka leh, ama dadka qaba xaaladaha caafimaadka, ayna ku jiraan dadka ay liitaan nidaamyadooda difaaca jirka ama qaba cudurada neef mareenka sida neefta daran, ayaa khatar wayn ugu jira nay qaadaan fayriska. Shaqsiyaadkaan waa inaysan ilmaha siin daryeel ama aysan imaan xarumaha daryeelka carruurta.

Baaritaanka Caafimaadka Marka xarunta lasoo galo

Hubi heerkulka oo baar astamaha shaqaalaha iyo carruurta markay xarunta galayaan maalin kasta oo waydii haddii ay adeegsadeen daawooyin si hoos loogu dhigo heerkulka ilmaha iyo haddii ay jiraan xubno kale oo qoyska ka tirsan kuwaasoo qaba COVID-19. Haddii aadan haysan aaladaha heerkulka cabira ee wajiga ama kuwa la tuuri karo, waxaad ka codsan kartaa daryeelaha inuu buuxiyo uuna saxiixo foom sheegaaya heerka kulka cunugooda ee lagu cabiray guriga (ama xaqiijinaaya inaan ilmuhu qandhaysnayn) iyo astaamo kasta.

Kala fogaanshaha Dadka

Ka dhig dadka meelaha iskugu imaanaaya waxaan ka badnayn 10 qof wadarta guud, ayna ku jiraan carruurta iyo dadka waawayn (tusaale, hal qof oo wayn iyo sagaal carruur ah, laba qof oo waawayn iyo sideed carruur ah, imw). Kooxaha isku meel ku hay maalinta oo dhan, ha isku darin kooxaha (tusaale ahaan, marka xarunta la furaayo iyo marka la xiraayo). Illaa heerka suurtagalka ah, sidaas ha ahaadaan kooxuhu maalin kasta. Arintaani waxay gacan ka gaysan doontaa yaraynta inay cudur qaadaan waxayna ka hortagi karta in barnaamijka oo dhan albaabada la iskugu dhufto haddii cudurku xarunta ka dilaaco.

Si aad u yarayso masaafada u dhaxeeya dadka kuwada jira kooxaha, kusoo koob dadka qolalka galaaya 10 qof xarumaha caadiga ah ee daryeelka carruurta ama dugsiyada hoose. Qolalka waawayn, sida xarun jiidka oo leh meelaha lagu ciyaaro kubada kolleyga oo dhamaystiran, ayaa loo qaybin karaa laba qol. Markaad qol kala qaybinayso abuur xakabado muuqda oo kala qaybinaaya sida qasacyo, kuraas, miisas iwm. si aad u hubiso inay u dhaxayso ugu yaraan 6 talaabo labada kooxood.

Ka dhaqan gali hanaanka kala fogaynta dadka ee kooxaha illaa heerka suurtagalka ah, adoo diirada saaraaya ugu yaraan sadex ilaa lix talaabo inta u dhaxaysa carruurta yaraynaayana waqtiga carruurta isku dhawaanayaan.

- Baabi'i shaqooyinka ay dadka badan isla qabanayaan.
- Yaree tirada carruurta ku jirta xarun kasta oo barnaamij lagu baxsho.
- Yaree badka u dhaxeeya carrurta inta lagu jiro shaqooyinka miiska.
- Abuur nashaadaad aan abuurayn inay jir ahaan isku dhawaadaan carruurta.
- Yaree wadaagista alaabta, haddii alaabta la wadaagana, xasuusi ilmaha inaysan taaban wajigooda ayna dhaqaan gacmahooda kadib markay alaabta isticmaalaan.
- Yaree adeegsiga miisaska biyaha ama dareenka si degdeg ahna gacmaha u dhaqa kadib marka la adeegsado qalabkaan.
- Yaree waqtiga istaagida laymanka.
- Abuur waqti dheeraad ah oo banaanka la joogaayo furna daaqadaha si joogto ah.
- Balaari nidaamka HVAC si hawo dheeraad ah oo nadiif ah ay usoo gasho xarunta barnaamijka.
- Ka dheerow inaad dad badan meel iskugu keento sababtay tahayba. Waqtiga banaanka iyo qadada waa in lagu sameeyaa kooxo (lama ogola in la isku keeno dad badan ama kooxaha la isku daro).

Ciyaarta banaanka

- Bixi ciyaarta banaanka adoo adeegsanaaya tookooyin kooxba mar galayso. Haddii kooxo badan banaanka joogaan iskumar, waa inay kala fogaadaan ugu yaraan lix tillaabo oo bad furan ah inta u dhaxaysa meelaha banaanka ee lagu ciyaaraayo ama ay kooxba mar gasho aaga si aysan iskugu shamuumin. Mar kasta si degdeg ah u dhaq gacmaha kadib marka ciyaarta banaanku dhamaato.

Waqtiyada cuntada iyo cuntooyinka fudud

- Cuntooyinka iyo kuwa fudud waa in lagu baxshaa fasalada hadday suurtagal tahay si looga fogaado in kooxo badan isku imaadaan.
- Haddii ay qasab noqoto in cuntada lagu cuno qolka qadada, fadlan kala fogee waqtiga cuntada, kala fogee miisaska si aad u hubiso in ay jirto bad dhan ugu yaraan lix tillaabo dhexda meelaha ay kooxuhu ka fadhiyaan qolka qadada, oo nadiifi miisaska inta u dhaxaysa tookooyinka qadada.
- Meesha ka saar cuntooyinka qaabka qoyska loo cuno ama u sheeg shaqaalaha (ma ahan carruurta) ay maamulaan maacuunta ayna cuntada siiyaan dadka si looga hortago faafida jeermisyada.

Keenista iyo qaadista ilmaha

- Ha isku darin kooxaha subixii iyo galabkii.
- Waxaad u baahan kartaa inaad isku badesho waqtiyada qaadista iyo keenista ilmaha ee koox kasta oo kooban si aad uga dheerato in tiro badan oo dad ah iskugu imaadaan banaanka xarunta ama albaabka xarunta.

- Dhaq gacmaha ama adeegso daawada gacmaha kahor iyo kadib intaan lasoo galin iyo intaan laga bixin xarunta. Lama wadaagi karo qalimaanta. Waalidiintu waa inay adeegsadaan qalimaantooda shaqsiga ah markay ilmaha keenayaan. Haddii soo galinta ilmuhu tahay mid elektarooniga ah, sii dadka istiraasho aalkolo leh oo si joogto ah u nadiifi shaashadaha iyo keeyboorada.

Farsamooyinka nadaafada

- Samee nadiifinta gacmaha adoo ku dhaqaaya saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 sikiin, qasabna ka dhig in gacmaha la dhaqdo marka lasoo galaayo xarunta, marka la galaayo fasalka, kadib marka la galo musqusha, iyo ka hor intaan la aadin guriga. Ka caawi carruurta siday qaab sax ah ugu samayn lahaayeen tillaabadaan.
- Haddii aadan haysan saabuun iyo biyo diyaar ah, adeegso nadiifyaha gacanta oo leh aalkolo 60% daawada aalkolada.
- U sheeg carruurta, qoysaska, iyo shaqalaha inay joojiyaan taabashada indhaahooda, sankooda iyo afkooda oo aay ku taabtaan gacmahooda oo aysan dhaqin.
- Ku dabool qufacyada iyo hindhisooyinka tiish, kadibna tiishka ku rid qashinka kadibna ku dhaq gacmaha saabuun iyo biyo ama daawada gacmaha nadiifisa (haddii aadan haysan biyo saabuun diyaar ah).
- Bixi alaabo ku filan nadaafad wanaagsan, ayna ku jiraan goobaha nadiifinta gacmaha oo nadiif ah shaqaynaayana, saabuun, shukumaan xaashi ah iyo daawada nadiifinta ee aalkolada ka samaysan.

Gaadiidka

In kuraas iskudhaw la fariisto basaska ayaa keenaysa inay bataan isku gudbinta dadka dhexdooda isku gudbiyaan cudurada neef mareenka ku dhaca. Qolyaha gaadiidka ku gaynaaya carruurta xarumaha daryeelka waa inay kordhiyaan badka u dhaxeeya dadka baska saaran (tusaale, in hal qof ku fariisto kursigiiba layn kasta oo kuraasi taalo). Inaad daaqadaha furto ayaa yarayn karta isku gudbinta fayriska. Hoos ka fiiri tilmaamo ku aadan nadiifinta iyo daawaynta basaska.

Waxaa la samaynaayo haddii uu cudurka COVID-19 ku dhaco ilmaha, shaqaalaha, ama waalidiinta

Shaqaalaha ama carruurta dareema qandho (100.4 F ama kasii badan), qufac, ama neeftu dhibayso waa in laga saaraa xarumaha daryeelka ilmaha ayna ka fogaadana dadka kale. Carruurta la nool xubnaha qoyska ee la ogyahay inay qabaan cudurka COVID-19 waa inaysan sidoo kale imaan xarunta daryeelka ilmaha.

Haddii ilmo ama shaqaale uu yeesho astaamaha cudurka COVID-19 (qandho dhan 100.4 F ama ka badan, qufac, ama neef yari) intay joogaan xarunta, si degdeg ah uga fogee qofka dadka kale ee caafimaadka qaba ilaa qofka xanuunsan ka baxaayo xarunta. Haddii astaamuhu wali sii socdaan ama kasii daraan, waa in qofku wacaa dhakhtarkiisa si loo siiyo tilmaamo. U sheeg waalidka ama daryeelaha shaqalaha ama cunuga inay u sheegaan xarunta si degdeg ah haddii qofka laga helo COVID-19.

Haddii ilmaha ama shaqalaha laga helo cudurka COVID-19, waa inaad la xariirtaa laamaha caafimaadka ee deegaanka si loo raadiyo dadka la joogay qofka ee u baahan inay iskarantiilaan. Waxay u badan tahay in dhammaan xumaha kooxda ilmaha ama shaqaalaha cudurka laga helay loo aqoonsado dad u dhawaa bukaanka.

Xarumaha waajahaaya kiiska la xaqiijiyay ee cudurka COVID-19 ee laga helay dadkooda waa inay ka fakaraan xirista xarunta ugu yaraan si ku meel gaar ah (tusaale ahaan, 14 maalmood, ama sida suurtagalka ah ka badan haddii saraakiisha caafimaadku amarkaas baxshaan.) Mudada uu soconayo ayaa ku xirnaan kara heerarka shaqaalaha,

Daryeelka Ilmaha Intuu Socodo Cudurka Coronavirus - Bogga 3

heerarka cudurku ku dhex faafay bulshada iyo darnaanta xanuunka haya dadka cudurku ku dhacay. Shaqaalaha iyo ilmaha aan lahayn astaamaha cudurka waa inaysan ka qaybgalin goob kale, taasoo keeni karta inay dadka kale qaadsiiyaan.

Haddii qofka cudurka laga helay ama laga shakiyay inuu qabo COVID-19 uu waqti yar joogay (tusaale, 10 daqiiqo ama ka yar) meelaha u dhaw dadka ku sugan daryeelka ilmaha, xarunta ayaa ka fiirsan karta inay adeeggeeda xidho 2-5 maalmood si ay u samayso nadiifin iyo daawaynta aaga una si wado la socoshada dadka xanuunsada.

Ku laabashada xarunta daryeelka ilmaha kadib marka laga helo astaamaha looga shakiyay xanuunka COVID-19

Haddii shaqaale ama ilmo uu qabo astaamaha COVID-19 ama uu la joogay qof qaba cudurka COVID-19, way ku laaban karaan xarrunta daryeelka ilmaha haddii shuruuda soo socota la buuxsho:

- Haddii qofku qabo qandho, qufac ama ay ku yartahay neeftu uusan u dhawayn qof laga helay cudurka COVID-19, waa inay guriga joogaan aysana u tagin dadka kale ilaa 72 saacadood marka qandhadu ka jabto astaamahooduna ay bogsoodaan. Haddii astaamaha qofku kasii daraan, waa inay wacaan dhakhtarkooda si loo go'aansho haddii ay tahay in laga baaro COVID-19
- Haddii qofka laga helo COVID-19, waa inaysan imaan xarunta ugu yaraan 7 maalmood kadib marka ay dareemaan astaamaha koowaad. Way soo laaban karaan ayagoo raacaaya astaamaha soo socda:
 - Haddii aad qabto qandho, 3 maalin kadib marka qandhadu kaa jabto IYO haddii aad aragto inaad kasoo bogsoonayso astaamihii hore (tusaale, qufaca, neef yarida);
 - Haddii aadan qabin qandho, 3 maalin kadib marka qandhadu kaa jabto IYO haddii aad aragto inaad kasoo bogsoonayso astaamihii hore (tusaale, qufaca, neef yarida); **AMA**
 - 7 maalin kadib markii qandhadu kugu bilaabatay
- Haddii qofku aaminsan yahay inuu la joogay qof qaba cudurka COVID-19 laakiin aysan hadda jiranayn, waa inay la socdaan qandhadooda si ay u fiiriyaan inay qabaan qandho, qufac, iyo neef yaraan inta lagu jiro 14 maalmood kadib maalintii u danaysay ee ay la joogeen qofka jiran ee qabay COVID-19. Waa inaysan aadin shaqada ama dugsiga, waa inaysan tagin meelaha dadku ku badan yahay 14 maalmood.

Habraacyada nadaafada iyo daawaynta

Kordhi xawaaraha aad ku nadiifinayso boonbalayaasha, qalabka, iyo meelaha dushooda, gaar ahaana qataarada, albaabada qaanadaha, iyo musqulaha. Adeegso istiraasho leh aalkolo si aad u nadiifiso keeyboorada iyo elektarooniyada kadibna dhaq gacmaha markaad isticmaasho kadib. Yaree suurtagalnimada faafida jeermisyada gudaha xarunta adoo si ku meel gaar ah u bixinaaya boonbalayaasha aan si fudud lagu nadiifin karin (sida xayawaanada boonbalaha ah iyo barkimaha) Aadna rogrogto boonbalayaasha la bixin karo waqti kasta si qaab ku filan loogu dhaqo looguna nadiifiyo.

Haddii kooxo carruur ah ay kasoo baxayaan meel ayna u guurayaan meel kale xiliyada tookaysiga, habraacyada nadaafada waa in la sameeyaa ka hor intaan koox cusub soo galin aaga.

- *Nadiifin* waxaa laga wadaa bixinta wasaqda iyo qashinka, ayna ku jiraan jeermisyada, lagana saaro dusha meelaha. Nadiifin kaliya ma dilayso jeermisyada. Laakiin marka ay saarto jeermiska, waxay yaraynaysaa tiradooda sidaas awgeedna waxay yaraynaysaa khatarta faafidooda.

- *Dilista jeermisku* waxay ku shaqaysaa inaad adeegsato kiimikooyin si loo dilo jeermisyada saaran dusha meelaha kadib marka sheey la nadiifiyo. Dilista jeermisyada kadib marka meesha la dhaqo ayaa sii yaraynaysa khatarta faafida caabuqa. Iskudayga inaad wax daawayso adoo nadiifin waxay yaraynaysaa waxtarta daawada jeermiska waxayna abuuraysaa in jeermisyo badan meesha ku haraan.

Tillaabooyin dheeraad ah la qaadaayo kadib nadiifinta caadiga ah maaha kuwo muhiim ah si loo yareyo faafida cudurada neef mareenka sida Coronavirus. Xarumuhu waa inay raacaan habraacyada nadiifinta nadiifiyaasha qolyaha saddexaad ay siiyeen oggolaanshaha (Green Seal, EPA Fragrance-free Safer Choice) “cagaaran” ayna adeegsadaan daawooyinka jeermiska dila ee ay aqoonsatay Environmental Protection Agency (EPA, Wakaaladaha Difaaca Bii'ada) - fiiri [Liiska N: Daawooyinka nadaafada ee loo adeegsado cudurka SARS-CoV-2](#).

Haddii ay suurtagal tahay, dooro daawooyinka jeermiska iyo nadiifiyaasha qaybta ka ah barnaamijka EPA ee Naqshada Bii'ada ee Ka dhanka ah Noolayaasha (jeermis dilayaasha badbaadada leh) sida kuwa ka samaysan hydrogen peroxide ama aalkolada. Maalin kasta nadiifi kadibna daawada jeermiska ku shub meelaha iyo alaabta aadka loo taabto. Meelahaan waxaa ku jira musqulaha, qaboojiyaasha biyaha, miisaska, qaanadaha, qataarada, keyboorada kubuyuutarka, qalabka gacanta ee waxbarashada, tuubada biyaha, taleefanada iyo boonbalayaasha.

Haddii laga heli karo xaruntaada, dadka meesha masuulka ka ah waa inay daawada jeermiska ku shubaan maadama ay tababar u qabaan adeegsiga daawada jeermiska qaab amaan iyo waxtar leh ayna nadiifiyaan meelaha ay u badan tahay in caabuuq ku yaalo iyo dheecaanada jirka - dhiiga, mataga, saxarada, iyo kaadida. Dusha meelaha ee in si wayn loo nadiifiyaa si loo saaro dhammaan waxyaabaha muuqda kahor intaan daawada jeermiska lamarin sidii la rabay. Daawada jeermisku waxba kama tarto wax oorganig leh.

Shaqaalaha nadiifintu waa inuu raaca tilmaamaha daawada jeermiska ee shirkada samaysay:

- Si fiican u qas daawada jeermiska.
- Ilaali waqtiga qoyaanka ee loo asteeyay inaad ku shaqayso daawada jeermiska.
- Raac tilmaanta daawada ku dhagan ee digniinta iyo tilmaamaha personal protective equipment (PPE, difaaca qalabka shaqsiga ah) sida galooftisyada, difaaca indhaha, iyo hawo kugu filan.
- Ku adeegso daawada jeermiska meel aad ka helayso hawo badan. *Adeegsiga badan ee daawooyinka jeermiska waa in la sameeyaa marka aysan ilmuhu joogin xaruntana si wayn loo haawiyay kahor intaan carruurto soo galin.*
- Xarumaha daryeelka ilmuhu waa inay lahaadaan Safety Data Sheet (SDS, Waraaqda Xogta Badbaadada) oo loo diyaarshay kiimiko kasta oo lagu isticmaalo xarunta.
- Waalidiinta iyo shaqaaluhu waa inay bixin daawada jeermiska iyo nadiifiyaasha.

Basaska

Fur daaqadaha kadib marka basku dhaqaaqo oo hawo sii basaska. Basaska waa in lagu nadiifiyaa daawada nadiifinta oo shirkad kale ay ansixisay maro istiraasho ah. Gacnada albaabada waa in markaas kadib lagu shubaa daawada jeermiska oo ay aqbashay EPA. Waa in daaqaduhu furnaadaan si looga hortago in kiimikadu isku aruurto kuwaasoo keeni kara dhibaatooyin dhanka indhaha iyo neef mareenka ah.

Meelaha lagu ciyaaro

Daawaynta jeermisyada ee meelaha banaanka ah ee lagu ciyaaro maaha muhiim ama laguma talinaayo ilaa inay ku daataan maahee dhiig, kaadi, saxaro, ama matag.

Nadiifin "Qoto dheer"

Arintaan waxaa badanaa looga jeedaa nadiifin dheeraad ah, boor ka jafid iyo buufinta HEPA si meesha looga saaro xashka daadsan loona xaliyo dhibaatooyinka neefta. Marka laga hadlaayo maaraynta caabuqa waxay ka dhignaan kartaa nadiifinta meelaha ayadoo lagu dhaqaayo saabuun iyo biyo kadibna si ku habboon loogu shubo daawada jeermiska

meelaha aadka loo taabto. Marka la sameeyo, si gaar ah ayay muhiim u tahay in la adeegsado difaacyada PPE oo quman, hawo fiican la qaato, si adagna loo haawiyo xarunta kahor intaan ilmaha iyo dadka kale kusoo laaban.

Nidaamyada buufinta daawada jeermiska

Nidaamyada ayaa u muuqan kara inay kaa yareeyaan shaqaalaha. Hase yeeshee, shaqooyinka qaar iyo/ama kiimikooyinka ayaan ahayn kuwo amaan ah si lamid ah dookhyada kale. Meelaha waa in wali marka hore la nadiifiyaa si loo saaro waxyaabaha muuqda. Inaad daawada ku buufiso hawada, darbiyada, iyo meelaha jilicsan laguma talinaayo, maaha muhiim, waxna ma tarayso, ama amaan ma ahan. Inkastoo dhammaan daawooyinka jeermisku khatar yihiin, xarumuhu waa inay adeegsadaan daawooyinka jeermiska ee aqoonsiga ka haysa Barnaamijka Bii'ada Noolaha ee EPA markay suuragal tahay.

Xarumaha daryeelka ilmaha waxaa lagu boorinayaa inay ka fogaadaan adeegsiga nadiifiyaasha iyo daawada jeermiska ee ay ku jirto maadada quaternary ammonia.

“Quats” waxay kiciyaan neef xiranka - waxay keenaan in neeftu dadka ku dhagto, xasaasiyada maqaarka, waxay kiciyaan sanbuurka mana lahan jeermis dile ku filan shaqada. Xirmooyinka Sodium dichloroiso-cyanurate (dichlor) ee buufiyaasha soo saara aashitada hypochlorous ayaa ka amaan badan buufiyaasha qaarkood, laakiin wali ah maado koloriin ah waxayna kicin karaan neefta qofka qabata. Noocaan koloriintu waxay ka amaan badan tahay tan midabka badasha. Dareeraha waxaa ku jira pH ~ 6-7 sidaas awgeedka Department of Labor and Industry (L&I, Waaxda Bii'ada iyo Shaqaaluhu) ma amrayso in degdeg indhaha loo dhaqo. "Qiiqinta" - ku buufinta kiimikada hawada - maaha wax fiican, laguma talinaayo, muhiim ma ahan, ama amaan ma ahan.

Daawada wax cadaysa

Daawada midabka badasha maaha nadiifiye ama daawada jeermiska oo amaan ah. Waxay keentaa xanuun waxayna leedahay pH aad u sareeya oo neefta kiciya. L&I ayaa u baahan in degdeg indhaha loo dhaqo marka la iskudaro baraxa daawada midabka badasha. Haddii daawada midabka bi'isa loo adeegsado nadiifin ama daawaynta jeermiska, raac tilmaamaha daawada ku qoran si aad qaab wanaagsan iskugu qasto aadna u dajiso waqtiga qoyaanka. Adeegso hawo kugu filan.

Roogaga

Inaad daawada jeermiska ku shubto roogaga maaha muhiim ama qasab uma ahan fayrisyada neef mareenka. Fayrisyadu muddo dheer kuma noolaan karaan meelaha jilicsan. Buufin adag ayadoo la adeegsanaayo qalabka ay nadiifisay HEPA ayaa kaa caawinaaya bixinta boorka iyo xashka. Haddii uu jiro dhiig, kaadi, xaar, ama matag, dadka wax nadiifinaaya waa inay si adag u dhaqaan roogaga ayna ku dhaqaan kiimikooyinka loogu talagalay. Aaladaha qasaca wata ee biyaha kulul ku jiraan oo wax qalajinaaya 24-48 ayaa fiican in la isticmaalo.

Haawinta

Ma jirto nadiifin ama daawo ku shubid gaar ah oo loo sameeyay nidaamyada aaladaha wax kululeeya, kuwa hawada, mashiinka hawada (HVAC). Haawintu waa qayb muhiim ah oo kamid ah dhawrista hawada gudaha guriga. Haawin kufilan - in qofkiiba uu helo 15-20 cfm/oo hawada dibada ah, iyo adeegsiga sifeeyaasha MERV 13, ayaa gacan kuyeelan kara tayada hawada WAXAYNA gacan kaa siin karaan yaraynta gudbinta cudurka neef mareenka.

Qalabka gacanta ee waxbarashada oo la wadaago

Waa in alaabtaan la dhaqaa dhamaadka maalinta. Biyo iyo saabuun ayaa ah talaabada koowaad. Alaabaha qaar ayaa intaas kadib la nadiifin karaa. Xirmooyinka lagu ciyaaro lama nadiifin karo ama lama dhaqi karo, marka qof kasta u samee qasab magaciisu ku yaalo, ama jooji adeegsigooda. Xarumuhu waa inay saaraan miisaska biyaha, miisaska dareemaha, iwm. si aan loo adeegsan waqtigaan ayna yareeyaan alaabaha waxbarashada ee la wadaago laguna soo koobo kuwa la dhaqi karo lana daaweeyo dhammaadka maalinta ama si ka badan haddii loo baahdo